

19 – KA SHAQEYNTA HARAGGA I

Cali Mudiir Subax waanagsan, saaka oo afar iyo labaatan ay bishu tahay bishi shanaad 84 khamiis.

Waxay ka hadlayaan odeeyaashu dooddoodii joogtada ahayd ee ku saabsanayd kolba dhaqammadayna, ama habkeyna dhaqandhaqaale, taariikh ahaan, dhaqan ahaan, caado ahaan hiddo ahaan, wax kasta oo aan u leenahay oo qayb bulshadeed ah.

Haddaba maantay waxaanu ka hadleynaa sancayahanka loo yaqaan kabatole.

Sidaas awgeed waxaynu soo niri tan iyo markii ay bilaabatay qayb kasta shaqadu oo dadku ay ku kala tageen habka shaqada oo kooxiba shaqa yeelatay ayaa nin la arka u baahday ama koox kasta u baahatay hawl u gaar ah ama waxa la yiraahdaa takhasus ama specialist addunka dhan bay jirtaa mawduucaas ayaan maanta ka hadleynaa.

Waxaana kaalinta uga horreeya aan u dhiibeyaa oon ku soo dhaweynayaa Jaalle Sheekh Buraale ku soo dhowow.

Jalle Sheekh Waad mahadsantahay Cali.

Buraale Horta kabatole marka la yiraahdo, kabatole marka aynu aad u baadhno waa wajiyo badan yahay.

Mar waa la isku caayaa, oo waxaa la yiraahdaa “ninkaasi waa kabatole” oo arrintaas farsamadaas ugu wanaagsan nooca wanaagsan ah ayaa lagu caayay, ee wax kale uu leeyahay ma jirto.

Ninkaas kabolaha la yiraahdo ruuxiisa dadka aan wax tolin ee soomaali weynta ee ayadu faantaa misna waa ku kala tiirsanaan jiray, oo qolo waliba kabatole gooni ah ayey leedahay oo ka tirsanaa reerka.

Ninkaasi sancadiisa markeynu u galno wuxuu leeyahay qalab u gaar ah oo fara badan oo dhinac walba u baxa.

Rugtiisa waxay u badantahay meel waab ah ayay u badnaan jirtay.

Waabkaasna wuxuu dhigan jiray wax yar oo maqaar ah oo ku fariisto ayuu lahaan jiray dabna waa u shidnaan jiray.

Dabka marka waa kala weynyahay. Dabkaas uu shideyaa waxaa weeye marka kabolaha ruuxiisa wax lagu mudo uu yare afka ka adkaado baa inta saas loo mariyo lagu subkaayo kabolaha ruuxiisa ayaa dhuxushaas ka dawa ahaan jirtay.

Kabaha ruuxoodu waa boqol nooc weeye oo midba nooc baa loo tolaa oo mid xagga ragga aa loogu tolaa midna waxaa loo tolaa haweenka.

Tan ragga marka aynu soo qaadanno. Waxaynu ka dhigeynnaa reerkii ninkaas uu ka tirsanaa kabaha loo tolayo. Marka kabahaa la tolayo labo nooc baa loo kala toli jiray, midna waxay ahaan jirtay mid dad uu san ka tirsaneyn u dhiibtaan oo ay la heshiiyaan oo ay yiraahdaan waxanu dooneynaa kabaha caynkaas ah inaa noo tosho. Kabahaas oo midna ay ahayd kabaha la yiraahdo *fayganuurte* oo iyadu aan cagba cag ahayn, cagwalba gasha oo loo qaato. Marka kabahaas waxaan dooneyaa kabahaas inay qaro wanaagsan leeyihiin, waxaan doonayaa kabahaas dhidhidh dhawr wanaagsan

inay leeyihiin, waxaan doonayaa kabahaas *indhalaqaad* inay leeyihiin, waxaan doonayaa kabahaas inay daruuro yihiin. Kaba tolkoodu dhan yahay oo saddax tolan leeyahay. Markaas waxaa loo sameyn jiray xagga dambe ciribta iyo xagga hore masaabiir saddax ah ama laba ah yaa lagaga dhufan jiray. Kabatolow marka maxaa tahay? Kabatole horta waa magac. Magacaas yuu ka dhexeeyaa? Wuxuu ka dhexeeya saddax waji ayuu ka dhexeeyaa. Ninka tolo waxaa la yirahdaa kabatole, oo cay baa looga dhigaa. Midna waxaa weeye mid daab leh oo lagu mudo kabta ruuxeeda oo maxaarka iyo mudaca ka dheer oo kabatolaa la yirahdaa isagana. Kan loo dhigo wuxuu u badanyahay geed la soo gooyey oo afar rukun leh oo jiifa oo kabta iyo kabatolaha uu ka hooseeyo. Maxaa yeelay kabtii dushaa la saarayaa kii hoose ahaa oo qoriga ahaana hoosta ayuu mareyaa kabatolihii ruuxiisa iyo birta ahaana dusha ayuu ka mudayaa. Intaas oo dhan kabotolaa la yirahdaa xerada kabotolaha, ama waabkii kabatolaha yaa la yiraahdaa. Markaas waa teynu niri labo qaybood buu ninkaas u tolaayoo reerka dibadda ka ah reeka uu ka tirsanyahay wax bey kula heshiiyaan ma sabeen bey kula heshiiyaan ma toban rubood bey kula heshiiyaan ma wax kaley kula heshiiyaan, heshiis gooni ah bey leeyihiin. Laakiin reerka uu ninkaas ka tirsanyahay wax badan kama qaato gunno gooni ah baa la siiyaa. Gunnadaas maxay tahay? Gunnada bal metel xooluhu markey dhalaan, caanuu ku leeyahay. Marka caanaha la lulo weelo uu ku leeyahay oo burcadka ah. Xoolaha marka la qalana wuu qalaayoo cad gooni ah ayuu ku leeyahay, ninkaa kabatolaha ahi, oo waa tan la yiraahdaa calashaan xagga dambe oo sinta la yiraahdo iyo sarraxa ninka kabaha tola sarraxa uu leeyahay sinta wax ku ma leh, waa reerka uu ka tirsanyahay. Intaa gawraca ah ee luqunta leh ee madaxa leh karraysaha leh ee ka soo horreysaa ilaa lafsakaarta waxaa la yirahdaa sarrax, sarraxana waxaa la siiyaa ninka isaga ah, waa reerka uu ka tirsanyahay. Marka wax badan oo adduun ah oo ku heshiyaan ma jiro waa mid reerka ka tirsan haddii la guuro ugu horreya, haddii wax la oodayo ugu horreya, haddii wax la warabinaayo ugu horreya, haddii la yiraahdo, xigmad kale uu leeyahay waa ninka ugu hadal badan oo ugu murti badan oo ugu jaajaaleesan oo waa nimanka laga soo wariye aje ha igu haysan. Waa nimanka calashaan dadka yiraahdaan soomaalida kale ka tagtay yiraahdaan

*kabaheyga waa tolanlahaaye kabotole aan waayey,
hooyaday waan u tolilahaayey kabotole aan waayey,
gabadheyda waan u tolilahaayey kabotole aan waayey.*

Dadka uu ka tirsanyahay aa yiraahda, laakiin isaga ma yiraahdo, isagu waa farsamo yaqaan ugu horreya soomalida marka la eego.

Bal metal waxaad eegtaa, meel kaleba ha eegin, markaa yoobsontaa tagto meel walbo waab baa ka taagan.

Waa waababka kabaha lagu tola. Kabahaa algu tolo een gashano noocyo badan bey leeyihiin kuwa tola waa raggii kabolaha la oran jiray.

Waa kow waxay sameeyaan reerka la qurxinaayo ee arooska ah lamma bahal la yirahdo oo saddax saanoood oo la isku tolo ah, oo gabadha lagu dhibaadinaya ama lagu dhisayo ama reerka wanaagsan saantaa dusha la xijinaayo ee awrta lagu lammeeyo nimanka sameeya ayagu weye.

Marka hore marka la dhiso saamaha oo gadowyadeeda calaashaan si wanagsan inta loo dhiso loo ekeysiiyo ayaa la isku jaangooyaa markaasaa qurux deraadeeda labo saanoood oo labo dibi laga waxeeyay ama labo sac oo qurux badnaa yaa dhaxdhaxaad ah la geliyaa mid kale oo saddax qayb ahaan ah oo sidii marada oo kale ah, oo lamma baa la yirahdaa.

Iyagaa daruura iyagaa sameya iyagaa isku tola, waa ninkaas kabolaha la yiri.

Ka soo gudub masallayaasha aan ku dukanno aad aragteen ee sida masaajidka loo sameyay caadada horay sida quddiga loo sameeyay, xagga dambena la iskaga taago waad aragteen oo dhexdhaxaadda waxay ku leeyihiin daruur.

Daruurkaas waxaa weeye indhal la magdeeyey oo la indhaleeyey oo suuf laga dhigay yaa lagu daruuraday oo lagu tolay tif tif baa la yirahdaa. Tiftifka nimanka tiftifa ee sameeya sawirkaas waa iyaga.

Marka dadka wax ka sheega waa dadka dad ugu liidta ee marka la eego ama imanka aa ahaato ama hore aa ahaato faan ma ogi, aan wax kale aqoonin.

Iyaga waxaa weeye dadkii had iyo goor horey sida wanaagsan ku noolaa laakiin la liidi jiray, haatanna si wanaagsan ku nool oo waxay ku noqodeen waa farsamo yaqaan. Aduunyana waxay isugu dhuratay farsamo yaqaan.

Intaas haddii aan kaga baxo faalayaal la yiraahda oo faro badan ayaa jira.

Waxaa la yiraahdaa ninka farsamo yaqaanka ahaan jiray yaa naagtiisii dilay. Ereyo badan baa laga hayaa.

Waxay yiraahdaan naag buu gursadey, markaas ayey naagti ka dhicisey.

Markaas uu yiri “annagaa waalneynoo weel hoos u jeedaa wax ku shubaney”.

Waa tan la yiraahdaa. Ayagu aa lagu jareexeeyaa.

Waxaa la yirahdaa nin naagtiisa buu dilay oo muxuu ku dilay? Wuxuu yiri:

Naa gubataan gubi doono

Geedaha ka bixi doona

Biciidka daaqi doona

Biciidka aan dili doono

Suunka aan ka jeexi doono

Sumalka aan ku gedi doono

Subaggiisa kabbo
Sabeenta aan ku gedi doono
Sumalka ay dhali doonto
Subaggiisa kabbo

Taas bee tiri:

kabbanmaayo maaba heysaa maxaa la haaya ba

meesha uu ku dilay baa la yiri.

Waa jareexo lagu jareexeeyaa, waa lidniin dadka faano ee xun xun ee caqli xumo ku sheegaayaan, laakiin kuwa wax ka sheegaayo aa ka caqli xun. Waa iyada sidaa la yiraahdo.

Marka kabatole markaa aynu yiraahno waxaa weeye farsamada farsamo ugu wanaagsan horena ugu wanaagsan haatanna ugu wanaagsan laakiin dadku ma aqoonin iyagu oo nacfacooda u bahaan ayey misna ninka bahashaas kabaha tolaaya ku cayn jireen.

Mid kale waa la haayaa, gabadha ka tirsanaan jirtay waa kuwaan aan ka soo sheekeysanay, yaa reer Nugaasha dega ee xagga horey bariga xiga, bal metel, waxba qarinqaayno, waa reerka la yiraahdo Maxamuud Garaad ayey u ahayd kabatole oo reerkaas ka soo jeeday.

Markaas ee ka soo gudubtay waxay timid dadka hawdka dego oo la yiraahdo Garaad Faarax. Jilaal xuna waa dhacay. Markaas wixii reerkaas ee ku qaban jirtay ee ka weyday markaas ee tiri:

Kobtiiba la arag mise waa Garaad Faarax. Labadii reer ee wada dhashay ayey midba [...] ka dhigeysaa, oo waxaan ay qarineysaa [...] horaba waa la idiin ogaa, macnaha magaadhaan calaashaan Maxamuud Garaad.

Ereyada caykaasoo dhamme ee jajaad ah ee kaftanka ah laakiin marka eegto xigmad ka balaadhan leh iyaga aa laga heelaa.

Hadda markaad eegto jamhuuriyadeenna hadda iminka inta heesee murtida leh ee aad u ballaadhan waa reerkaasaa lagu sheegi jiray, meelkastaba ka eeg saasey inookana xigmad badnaayeen inookana farsamo badnaayeen.

Marka waxaa la yiraahdaa dadka soomaalida faani jiray hadba qolada dadka farsamayaqaanka u badan yahay aa adkaan jirtay. Marka la isku yimaado hadba qolada farsamoyaqaanku u badan yahay oo uu la socodo ayaa adkaanjirtay. Maxaa yeelay, waa ka xeel badnaayeen waa ka liishaan badnaayeen, oo wey ka karti badnaayeen, oo wey ka orod badnaayeen, oo ragga aad maqashay ee odeyaasha ahaa ee dadka dhan xukumi jiray, bil matal Habar Yoonisba ka eeg, gabaygii Ismaaciil Mire, ninkii dilay Xirsi Amaan reerkaas farsamoyaqaanka uu ahaa, markey Guuleed Xaaji islaayeen.

Markaas waxaa weeye calaashaan, reer kasta oo la yiraahdo reer buu soo dhacay ama rag buu ka laayey ama waa ka adkaaday wuxuu kaga adkaaday waa farsamoyaqaanka.

Marka anigoo aan wada xasuusneyn wixii aan oran lahaa rag badan ayaa iga dambeeya intaas waan iftiiminaayoo waa kaaga baxaayaa

Caliyow waana mahadsantahay.

Cali Mudiir

Ummad walba waxay leedahay dhaxal bulshadeed ay iska dhaxlaan oo inamadu aabbayaashood ka dhaxlaan abbayaashu awoowayaal ka dhaxlaan sacba sac ka dhaxlo ay ka dhaxlaan wax wanaagsan iyo wax xunba oo loo yaqaanno hiddo, caado, iyo xeerar iyo waxyaala adigu ay xurmeeyaan sidaas awgeed ayaa wax xun iyo wax sanba aynu leenahay. Wax kasta ha noqoto, annagaa leh waana ku faani karnaa wixii xunna waqtiigiisa ayeey ahayd wixii fiicannaa sideedey u fiican yihiin, hase yeeshee kii xumaa in looga gudbo kii ficnaana ku fiican lagu biiriyo ee sidaas garangarta mushtamacu ku socoto ayaa addunka dhan nala wadaagaa.

Bal haddaan u gudbo nin asaga si gaar ah akaadeemik u ah oo arrimahaas falanqeyn doona waa Axmed Nuur ku soo dhowow.

Axmed Nuur

Anigu horta marka hore waxaan codsanayaa in la i soo celiyo mar labaad maxaa jiro waa igu boobtay anoo weli baaritaankii haya. Kow horta marka ugu horreya waxaa anigu ku waafaqsanahay erayadii uu sheegay iyo hadalladii uu duubay ninka la yiraahdo Fiqi Buraale, oo arrintaas aad iyo aad waayo arag ugu ah. Marka anigana waxaan rabaa xoogaa inaan ka daba tuurto. Kadaba tuuriddaan ka daba tuurayaa waxay noqondoontaa kow bal marka u horreya kabatole sidaas Fiqi Buraale u sheegay ayaan aniguna u arkaayaa saddex waa waxyabada loo yaqaanna.

Qalabka kabaha lagu tola ayaa jira iyo qalab lagu sameeyo wax lagu sameeyo iyo dad loo sameyo. Horta saddaxdaas aan u kalaqaadno.

Kabaha waxaa laga sameeyaa sar ayaa laga sameeyaa, waxaa laga sameeyaa harag baa laga sameeyaa. Sar baa laga sameeyaa oo sarta geela iyo sarta lo'da ayaa loo yaqaanaa, aalaaba, sarta geriga.

Sagaal jire singaha dhawrka leh oo dumo la sarsaray sarta geriga sagaal xaajadlaha saanac kala jeestay saan uu yiri ninka. Marka geriga waa ku jiraa waa laga sameeyaa oo biciidka waa laga sameeyaa. Marka horta sar baa laga sameeyaa.

Waxaa jira wax la yiraahdo tolan ayaa laga sameeyaa harag baa laga jeexaa oo asagana waa nooc kale oo laakiin ka qafiif ah oo sooh buu noqodaa.

Qalabka lagu sameeya waxaa ka mid ah kabatole oo ka mid ah magaca kula baxay ninka kabaha tola lagu magac daray, waxaa kale lagu sameeyaa wax la yiraahdo qorag oo isaguna weyn ah oo hoos loo dhigo oo laga gooyo aalaaba dhirta dowlada laga gooyo geedka la yiraahdo coolasha iyo xagarka iyo geedaha jiljilicsan laga gooyo ayaa isagana lagu sameeyaa.

Waxaa kale oo lagu sameeyaa wax la yiraahdo kabayeel middi la yiraahdo oo aad u weyn oo af badan, ayaa lagu sameeyaa, waxaa kale lagu sameeyaa mudac wax la yiraahdo ayaa jira oo yar asagana oo isagana lagu daruuro oo isagana mudaca maqaarka lagu sameeyo ayuu ka mid yahay waxaa jirta maddiil yar oo iyadana af badan xaleefata ah oo lagu xoqo oo lagu qurxiyo ayaa jira.

Aniga intaan ka xasuusnahay waxyaabaha odayaasha wey ku sii daridoonan, noocyaha kabaha loo sameeya.

Horta anigu reer bari baan ahay, reer bari waxaan moodeyaa inaan ka duwanahay xooga inaan dhii iyo dhii ku sii dardno ayaan moodeya, inkastoo nalaka baahi badan yahay oo kabaha na loo ka baahi badan yahay oo ninka baadiyaha jooga waa ka baahi badan yahay laakiin qurxinta markey noqoto markii magaalada la tago ayey qurxan yihiin kabuhu ama nimankaan magaalada joogo ayaa qurxin badan oo si aad aad ah ayey u qurxiyaan kabaha nimanka magaalada ka tola.

Waxaa jirta kab haweenka aan qaadin, haweenka aa kabaa loo tolaa, caruurtana kabaa loo tolaa rag waaweyn kabaa loo tolaa, dhallinyarada kabaa loo tolaa.

Haweenka kabaha loo tola annagu xaggayaga waxaa la yiraa faydheer oo dabo yar leh futada ku leh oo faydheer la yirahdoo ayaa loo tolaayoo waxay leedahay gadaal jid ku leh oo fay aad u dheer laho far dheer gadaal ku lehoo jig dhe jig dhe jig dhe ku tiraahda, kabahaas haweenka kuwaasaa loo tolaa aalaaba.

Waxaa loo tolaa kuwo labosuunlaayoo af soo godan leh oo aad mooddo af qoolaaban leh oo aad mooddo shimbirtaan la yiraa wadkeed arag oo kale oo qalaaban af gaaban oo aan dheereyn leh lakiin oo kabihii ragga ka duban xoogaa oo hal suun buu leeyahay hal suun bey leeyihiin, haweenka kooda hal suun buu leeyahay.

Waxaa jirta kuwa carruurta loo tolo carruurta waa noocyo badan tahay haddii ay gabdho yihiin sida haweenka ayaa loo tolaa haddii ay wiilal yihiina sida ragga lagu tolaayoo noocba nooc ayuu u ekaanayaa.

Ragga marka waxaa loo tolaa marka kabo la yiraa labo suun leh ayaa badan.

Labo suunyahaas waxaa jirto kabo la yiraahdo labosuunleh, labosuunleh waa isla wada naqaannaa labo suun buu leeyahay ama jaan buu noqoodaa ama dhawr jaamood ayuu noqdaa.

Jaan hadduu noqodo waa inuu sar geri ahaado, sar geri hadduu saan ahayn jaan aalaaba ma noqodo.

Laakiin lo'da iyo geela iyo jaamo badan ayaa laga sameeyaa.

Labosuunlahaas wuxuu leeyahay wax la yiraahdo indhalaqaad, wuxuu leeyahay labo suun iyo indhalaqaad ayuu leeyahay. Wuxuu leeyahay wax la yiraahdo reged wax la yiraahdo ay kabahaas leeyihiin waa la regdayaa dhegohoodo, kabahooda waxay leeyihiin labo dhegood yare ee leeyihiin oo saan u qoolaaban oo aad mooddo dhegta dadka oo kale bey u eg yihiin. Reged baa la yiraahdaayoo waxa afka lagaga regdo tolan baa la qaataayoo, marka kuwii daruuro oo sida loo daruuro aad yaabeyso, sida uu sheegayo Fiqi Buraale waa ka sii xiganayaa anigana.

Marka waxaa jiro kabakaleto oo la yiraahdo kabacarbi, kabacarbi waa kuwa hadda aan wadwadano, labo suun oo horey ey leeyihiin, labadooda suun waa kala dherdheryihiin, suunka horey waa yaryahay xoogaa waa dhubanyahay, kan dambe waa ballaaranayahay oo reysmagaartada oogadeeda ayuu kor uga kacayaa, wuxuu leeyahay meel indhalaqaad ah, iyo suulgeshe wax la yiraahdo.

Kabakaleto aa jiro oo la yirahdoo saddexsuunleh.

Saddexsuunleh waxaa waaye wuu soo godanyahay oo suunkii

dambe wuu jiraa, oo labo suun oo isdhafsan oo saan isku weydaaranayo oo labada dhegood u kala weydaaranayoo midba dhinac ka soo kacyo aad mooddo sidii istallaab isku gudbaaya oo saddex suunley dhahaan iyaguna waa kabo lagu xarragooda oo dhallinyarada magaalada ayaa loo sameeyaa ayagana magaalada Xamar ayey aad iyo aad ku badan yihiin saddaxsuunlaha, ayagu indhalaqaad ma leh.

Horta noocyaha intaa ka xasuus nahay intaas weeye kabeheena horey.

Xagga aan u laabto halaamadda ninka la yiraahdo aan ujrada la siinayo.

Ereyga halaamadda waxaan ka soo qadanayaa nin lo' uu heesay marka wuxuu yiri: *Hagoogane Cali* lo'oda Cali Yusuuf aa leh aa la yiri, marka Cali Yuusuf waxaa loo kaxeeyn jirey caano, lo'da dhasha ayaa laga kaxeenjiray.

Marka Cali Yusuuf ma uu ogeyn. Waxaa kaxeeyn jiray dadka oo ka hooseeyo. Markaas wuxuu damcay inuu ogeysiyo Cali Yuusuf in lo'da wixii dhala laga kaxeysto oo isaga ilaalinteeda ma ahee inuu san nafac ku lahayn. Markaasuu maalinta dambe lo'da uu heesay.

Marka asaga wuxuu yiri:

Hagoogane Cali saaxiibkaa aa [...] anna hawshaan halaamad u helay ayuu yiri.

Ereyga halaamadda la yiraa waa ujuurada bilaadinka. Waxaa u moodaa calaamadda iney xoogaa [...], isaga calaamo ayuu ku sheegay. Ereygaas ninkaas aad iyo aad waxaad moodeysaa ereygaas ujrada carabi inaan kula wareegeyno asaga ninka ugu saxsan ahaa. Cali Yusuf aa loo sheegay Cali Yuusuf wuxuu yiri deg deg wax ka soo kaxeenkaro wuxuu asaga dooneya lo'da sidi u rabo ma ehee, intuu asaga kaxeeya yiraahdo ma ehee wax kale yaa laga soo kaxeeyn hadda ka dib, intuu ka oogaado. Wuu isku sheegay, nimanka hoose oo maqadimiinta iyo ee qayaameeyeen ee laga kaxestay ayuu rabaa inuu u sheego. Markuu ogaadey wuxuu yiri lagama kaxeeyn karo. Ilaa lo'da isaga uu ogolaado oo uu yiraahdo intaa la kaxeyo magaalo ha loo dhigo lama kaxeeyn karo. Marka ereyga halaamadda intaas aan ka soo qaatay.

Marka halaamadda uu qadanayo, ujuurada uu qadanaayo waxay ahayd marka ugu horreya marka kabaha uu toleyo gurigaa loo firaashaa halkaas waxaa la siiyaa aad iyo aad ninkaas waxaa la siiyaa cunno wanaagsan oo qadada guriga loogu karin jiray waa laga beddelay, cunno gaar ah ayaa la siiyaa. Waxaa la siinayaa cunno subag saa uga da'ayo waxaa la yiri:

faro aan dufan lahayn wax ma duubaanoo kabihii duugimayaan.

Walow si kale loo isticmaalay waa meesha laga keenay kaba aan fufan lahayni wax ma duuga.

Waxaa loo sameeyaa halkaasaa loo firaahsaayey oo waa loo sheekeeyaa, waa la ag fadhineyaa hadalkiisa aa la dhegeysanayaa, isaga aa meeshaas ah.

Marmar reer magaal waxay isticaaro ahaan ama hoosgeli, war la isku

hoosgelinaayo ee dhahaan nin wexey dhahaan marka la is xifaalinaayo waxay dhahaan *War hebelow maanta dheregbaa kaa muuqatee yaa kabo u toshay?* Macnaa ninka kaba tolay maalintaa waa feestadiisa waa barwaaqadiisa waa nin aad looga dambeynaayo waryaad kabaha u toshaa la yiraa marka il wanaagsan lagu arko.

Marka intaas waan ka baxayaa kuma dheerenmaayo, rag baa iga dambeeya badan. Waxaan u laabanayaa waxaa jira xeerka xeerka Fiqi Buraalaan ku raacsanahay intaa baa kaga harayaa oo kaga baxayaa tiisa ayaan aniguna ayidayaa xoogaa folkaloor iyo wixii laga yiri ayaan u laabanayaa waxaa laga yiri aan u laabanayaa waan ordeyaa iga ralli ahaada.

Gabeyga soo qaday ama hees folkaloori ah uu soo qaaday ninka la yirahdoo Fiqi Buraale ayaa anigu xoogaa aan ku dardarsanaayaa, sida annagu aan u naqaanno.

*Kabahayga waan tolanlahaa
Kabotole aan wayey
Habartey waan u tolilahay
Tolanki baan wayey*

Ayuu yiri, baa la yiri, nin kabo rabo inuu tosho.

Farti ayuu haysta farsamadii wuu yaqaan, lakiin labo waxyabood oo importanti ah ayaa ka maqan.

Maxaa ka maqan? Kabotolihi kan lagu tolilahaa oo saddexda noocyo oo labada nooc ahaa iyo tolankii ayaa ka maqan, marka haddii saddexdaa la isu haynna kabihii lama toli karo.

Waxaa kale la yiraahdaa oo oo halheysba ah oo hal ku dhegba ah *war xaajada kab kab ku dheg ha ka dhigin.*

Waxaa kale la yiraahdaa eray kale kaa ka duban oo u dhow, *xaajada waxaa ka dhigtaa kabta tolanka ku dheg* sida xaajada waxaa isku geysaa sida kab iyo tolanka la isku geeyo isugu dheji xaajada marka degdeg la diiday, *xaajada ha ka dhigin sidii kab kab ku dhegan* ha ka dhigin aa la yiraahdaa.

Marka la rabo in la degdegena waxaa la yiraahdaa xaajada waxaad ka dhigtaa kab iyo tolanka ka dhig. Maahmaahaha waa badan yahay, *kab sheydaan ka timiday wey jirtaa.* Marka kabta waa wax aad qeymo u leh, halkaas baan ka arkeynaa.

Waxay kaloo yiraahdaan kab iyo indhalaqaad. Xaajada waxaad ka dhigtaa kab indhalaqaad [...] waxay kaloo dhahaan

kab xumo ma haro ee kablaabwaa hara

[...] Haddii socdaal dheer la galo oo raggii geela dhici jiray Daahir Afqarsho ayaa inakala joogee raggaas goortey duulaan adduun soo gelbiyaanoo wax soo dhacaanoo wax soo qaadaan [...] weligiis waxaa coka ka hara ninka kablaawaha ah kab xume ma haro wixii suu badsadaa.

Marka maahmaahuhu iyo heesaha wey badan yihiin, kabta waxaa jira oo kaleeto hees kale oo ah oo waxaa jirta gabar baa la yiri baa reer curad eu ahayd.

Marka haddii reer curad u ahayd ilmo kale ma qabin. Marka gabadha wey weynaatey waxay noqotay nacas baali, mid ayaan dhaweyd Daahir Afqarshe ka sheekeynayey bey noqotay oo kale. Marka waxaa la yiri gabadha goortii ay weynaatay bey waxay noqotay wax nacas oo salleelo ah oo aad u liidata oo dambas kama kacdo ah bey noqotay.

Ayaantii dambe baa habartii iyo odaygii meel ay joogaan afartankii ku dhowdhow yihiin baa habartii waxay dhashay wiil markaas aa gabadha laga guray. Gabadha awel waa loo roonaan jirey wax walba iydaa loo sameyn jirey markaas waxaa iyadii la yiri ariga ilaali waana lagu cadaadiyaa ariga, kabaha looma tolo.

war doqonta xunta ah war ariga ilaali!

Ayaantii dambey heestaa la yiri, waxay tiri:

Aniga layma rabo, kabo layma tolo, wiilka unjul aa kabo loo toola, bey tiri.

Waxaa kaletoo jiro sheeko oo folkloori ah oo hees caan ah oo la yiraahdo *haawiye*, ereyga waxaa weeye *haa weeye* laakiin waa laa soo gaabiyey meel walba wuu maray, meel walba waa laga yaqaan, qabiil walba wuu ku dhaqmaa heeskaas, qabiil walba wuxuu geliyaa, markuu magac uu doonayo ayuu gashadaa.

Gabar iyo wiil ayaa lagu meteleyaa is shukansaday, gabar ari la joogta ama waxaro la joogta, wiilkii markuu shukansadey waxaa lagu heshiiyay inaad la isgursada markaasey raacdey si fudud bey u raacday reerihii wey ka tagtay. Markaa gabadhaa baa wiilka wuxuu wadoo wado ciddoodii u geeyay. Ciddoodii marka loo geeyay sidii loo aroosay ee loo soo dhoweeyay ayey ayey hees u tirineysaa baa la yiri. Waxay tiri:

*Waxaraa wad la yiri haawiye
Shaley reerkayagu guur haawiye
Guriyoo galbeed qabey haawiye
Waxaraa wad la yiri haawiye
Wadimaayo baan iri haawiye
Wadayoo wadaan waday haawiye
Balxad xagar ka soo rogey haawiye
Doob meel hurdo helay haawiye
Doobow balyaa tahay haawiye*

Waxaan aniga ku maqlay dad oo Ciise Maxamuud haawiye,

*Taran taran yaa tahay haawiye,
Taran taran Marexaan haawiye,
Kabaheyga igu raran haawiye,
Kabaheyga iga qaad haawiye,
Kabihisa igu rarey haawiye,
Waa soo rucleynay haawiye,
Aqallada la baalbaal haawiye,
Aqal buurta laga taag haawiye,*

[...] *gal la yiri haawiye,*
Gelimaayo aan iri haawiye,
Galayoo galaangalay haawiye,
Galayoo gurtii tegey haawiye,
Mise gudo madoobaa haawiyee

bey tiri. Heeskaas, oo hees carruureed ah inkasto aan mooday inaan wax ka tegtegayo, laakiin labada qabiilo aan ku soo daray qabiil walba halkii goorta uu joogo buu ku dersadaa, aniga saas baan ku maqlay, ma aqaan wax ii keenay iyo siduu iigu yimid ma garankaro, laakiin qabiil walba labada magaca wuu bedeshadaa, qabiilka loo rabo baa la gashadaa, miraha kalena waa la xafidsan yahay meel laga keenayse ma garan karo.

Marka aan dhinaca kale aan u soo laabto, anigu aad baan isugu mashquuliyey xirfaddaan, xirfadlayaasha ma aha kabatole keliya, ma aha birtume keliya, xirfadlayaasha waxaa ka mid ah ninka doomyaha sameeya, waxaa ka mid ah ninka guryaha dhisa oo kulligood la wada xaqiro, oo kulligooda si xun inaad u arkeyno, waxaana ku wacan ma ahan “*gaalka dil oo gartiisa sii*” labo dhaqan aa meeshaan dagaalamaayo dhaqanka primitive-ka ah ee xooladhaqatada iyo dhaqanka reer magaalnimada.

aarka qoladaan reer Miyigaa aad bey ulu dagallamayaan oo waxay diidayaan xirfadda iney xooladhaqatada ka erido oo xoolaha odeyaasha aad baa lola dagallamayaa, waa dhaqan dhaqan la dagallamaayo. Dhaqankaan dhaqan ilbaxnimo ku jirto weeye oo ilbaxnimo sida oo farsamo gaaray, maxaa yeelay ilbaxnimada aabaheed waxaa astaan u ah farsamo

Marka waa la la dagaallamaayaa, waxaan moodeyaa dhaqankaan oo farsamo yaqaanka inuu ka soo horreeyey dhaqanka xooladaqatada. Marka xooladaqatada wey la dagallamayaan wey dacaayadeynayaan weyna ka badan yihiin.

Marka dagallankaas la la dagallamaayo waxaa keenay baan moodeyaa dhaqankaan reerbaadiyenimada ayaa keenay saan u arkaayo ama aan doodo badan kaga qeyb galay.

Marka aan wiil gabar loogu diiday oo nin xoolodhaqataahi gabadhiisa ugu diiday birta uu tumaa asagu birta uu tumaa, abihiisnaa kabaha tolo hooyadiisna dheryaha sameeyso, abtiigiisana uu doonyaha sameeyo, adeerkiisana mallay gaado, abtiigiisana uu sameeyo, guryaha dhiso. Wiilkaas reerka farsamoyahanka ka dhashay ayaa siddeed iyo lixdankii mar aan sheeko dheer ka qoray oo yaab leh ayaan waxaan iri “*leys-ku-wadayaab*” ayaan sheekada u baxshey. Sheekada akademiya hadda waa taallaa ma aqaan waxa ay u soo saari diideen.

Mar aan hees ka tiriyey baa waxaan iri labo waxyabood, farsamada hees baan ka tiriyey heeska u yaaban wuxuu ahaa, oo sheekada ku socotey,

farsamada gahayrto
gacmaha lagu sameeyaa
gobonnimo u horeysoo

*uumiyuhu guuxay
go'ayee dadkeygii*

wiilkii aa leh hadda.

*Go'aye dadkeeygii
haddey garanlahaayeen
waxaan gudo
ama aan galo
gabadha iima diideen.
gudcur iyo habeen guul
gacandhada cagaha galey,
kabaha laga gashaansado
anoo tola ii diidey,
go'aye dadkeygii
haddey garanlahayeen
wax aan gudo
ama aan galo
gabadha iima diideen.*

Wuxuu kaloo wiilkaas ku cataabayaa

*Gembiga iyo dagaallada
goortii laba col leys galo
hubkaan anigu geeyaa
goobtaa lala tagaa
go'aye dadkeygii
haddey garanlahayeen
wax aan gudo
ama aan galo
gabadha iima diideen.
Gabley weeye reeruuuu
garkasto aan ka eegey
sanca laga gulaalyoo
gurac baa u muuqda*

Ayuu wiilkii ku cataabay, wiilkii waa la eryayaa, gabadhii waa loo diidayaa, baladaas ayaa dhacday.

Waxaan hadalkeygii ku soo gebagebeynayaa ma dhameynkareyno, waa igu soo degdegayoo Cali Mudiir baa boob igu qaadey ma ahayne ee hadda xoogaa baan sii dhigi lahaa wax baan sii aruurin lahaa waxaan rajeynayaa dib inaan ugu soo noqodo, waan ka baxay.

Cali Mudiir

Waxay ila tahay inaad waxba dhaafin, waxna ka tegin Axmed Nuur, waxna kama tegin waxna maadan dhaafin, weliba si (academic) ahoo xeel dheer baad uga hadashay mawduucaan sida la doonaayo waxay ahayd sida wax yihiin in loo sheego, mowduuciyahaan in wax loo sheego (Objectively) in wax loo sheego. Waxa kani annagu waxaan ahayn (mujtamac bidaa'iyah) bulsho bilaw ah, reer miyi ah, guurto ah, dambeyso, nala ay wadaagaan (mujtamacaad)

badan ee adduunka, carabta ay ka mid yihiin. Haddaba sidaan aheyn markaan sheegeyno macnuhu anba aanu nahay waxaa weeye iyada oo xaqiiqada ka waraney, geel labo jirka soo wada mar. Haddaba markaynu ka hadlayno kabatolaha, sida badan xirfadlaha ama ninka xirfadyaqaanka ah sida badan isaga qabiilkiisa u mustaaqilo ma ahan oo sidiisa u taagan oo naftiisa u taagan, dadkaas farsamoyaqaanka ahi badaana waxay ku kala firirsan yahay qabaa'ilka, oo gruuba kasta ama koox kasta qabiil ayey ka tirsantahay.

Sida Fiqi Buraale uu sheegayey, oo ay raacsan tahay oo ay sacadana u sameeyaan ama kabaha ha ahaadaan ama qalabka lagu dagaallamo ha ahaadaan ama ay ka tirsan yihiin.

Wolow la xaqiro ama la yasana la' aantood in aan la jiri karin yaa la aaminsanaa.

Laakiin waxaanu waa dhaqan sidaas awgeeda ayaa mararka qaarkooda waxaa suurowda niman shakhsiyaad waaweyn ah oo sancadooda iyo kabhooda ee sameysan jireen ay jiraan, Yuusuf waxaa ii sheegay hadda ka hor, adaanba kugu soo celinaa, Axmed Nuur, weli niman waaweyn ee boqrrada ah iney sameysan jireen bal waan kugu soo celinaa mar labaade, arrimahaas xoogaa bal ka si faahi, in dad ka gudbay ay jireen in sancadu ineyan yasni mudneyn ee uu samesan jirey. Bal Axmed Nuuroow aan kugu soo celiyo arrintaas. Wax ka sii dheh.

Axmed Nuur

Nin soomalidoo dhan aad u wada garaneyso oo ahaan jirey Boqor Cusmaan walaalkiisa oo gabayga Sayid Maxamed uu ku soo baxeyoo caan aho la yaqaan.

Waxaa la yiri Boqor Cusmaan hooyadiisii ayaa qolo kale ahayd oo hooyadaa aan Dir ahayn, Boqor Cusmaan wuu ka weynaa, waxaa la oran jirey Yuusuf Maxamuud Qoob-Weyne ayaa la oran jirey nin caan ah ayuu ahaa oo geesi ah oo balaayaa.

*Qoob weyne waa tuug, waa tuug muurreysiya
Qoob weyne waa muudal, waa tuug muurreysiya
Annagoo mardaaddi ah rati naga muurreysaday*

Daahir Afqashaa i sixi doona gabayga.

Waa niinki loogu yiri.

Qoob-Weyne wuxuu ahaa Boqor Cusmaan walaalkiis wuxuu ku lahaa magaalada Baargal boqortooyada caasimad u ahayd nin caan buu ku ahaa oo aad iyo aad darajo ku heysa ama kaba raganimo badan boqorka haddii la isku eego isaga iyo boqorka.

Waa ku faani jiray boqorka wuxuu oran jirey walaalkeyaa Qoob-Weyne ah.

Ninka noocaasi wuxuu lahaan jirey askar oo saddex boqol ah ayaa la joogi jirtay, askartiisana saddexda boqol ah kabaha isagaa u toli jirey. Wuxuu ahaa nin farsamo-yahan ah balaaya ah wuxuu sameyn jiray kabaha isagaa toli jiray.

Kulligoodu intey shaqada ku maqan yihiin marka ay meelaha u kala aadaan asagaaa kabaha u toli jirey. Warshad buu sameytay, wuxuu ahaa caan buu ku ahaa inuu kabaha tolo, boqorka walaalkiisna wuu

ahaa.

Yacni ma jirin xaggaa waxaad mooddaa magaaloooyinka iney ka baba'ayso oo farsamada fahmey waxyabahaas iney ka baba'aayaan. Caliyow waa mahadsantahay.

Waxaan illawey gabay gabeygaas waa gabay importanti. Waxaa la yiri gabeyga Nuurdhegey baa tiriyey. Gabaygaas waxaa ku jiro kabo. Waxaan jaclahay odayaashu gabayada kabo ku jira inay meesha geliyaan. Wuxuu yiri: Geel uu ergo u tegey, ninka la oran jirey Nuurdhegey, ayuu geelii ku rafaadey, markuu ku rafaaday qolo abtiyaashiisa, waxaa kala racay qolo reer oday u ah, ayuu dhexdhexadinayey. Marka wuxuu yiri ninka ugu dhedhexaadin dheeraa buu ahaa Nuurdhegey.

Waxay ku qaadatay hal sano dhedhexaadin. Lix iyo soddon jeerba waa la geeyayay, lix iyo soddonkiiba geelii waa loogu diiday. Marwalba geeliisii baa loogu diidaa. Nimankaan, nin oo iga soo horjeedo oo la yirahdo Dahir Afqarshe reerkoodi ayaa saa u gelaayo, nimankaas lix iyo soddon maalin walba wuu doodaa waxwalba wuu ku hadlaa. Waa ninka ku maahmaahaya, wuxuu ku maahmaahaybaa la yiri:

*kudkudaha gaajada aa ugu adkeysii badnaa
kurtunka qorrax aa ugu adkeyso badnaa
kelebka cayda waa ugu adkeysii badneen*

Wax walbuu sheegay waxaa la yiri geelii helimeysid, wuu soo noqodey. Maalinta hadalka la leeyahay geel helimeysid ayuu gabyey. Wuxuu yiri:

*Kalka aan imi kalkiisa miyaa kaabiga sarey
ma baqaaladii baa kawirey kirada doonayo
kabihii miyaa iga le'adey ee aan karan awoodwaayey*

Wuxuu gabayga soo wado [...] geel [...] kalamaandha, kalamandho ma aqaan.

Kalamandha meeshaa u yimi. Wuu iska dhaqaaqay wuu sabray waa la dagaallamey, dagaal xun baa dhacay waa lagu baba'ay calaa kull xaal gabaygaan aa ii soo celisay oo aan ilawey

kabihii miyaa iga le'adey ee aan awoodwaayey, ayuu yiri.

Halkaan wuxuu kaga caddeyneyaa inuu asaga kabihiiisaa tola njirey uu ka caddeyey. Waa nin caana oo gabyaa ah oo la yaqaan. Waan ka baxay.

Cali Mudiir

Haddii aa wax yare [...] aan ka saaro taaliq, annaga diinda markaan u noqonno Nabi Muxamed Caleyhi Salaatu Wa Salaam, marka la ammanaayo waxyaalka lagu ammaani jirey sifooyinka wanaagsan waxaa ka mid eh [...] kabihiiisaa waa sameysan jirey [...]

Kabihisa waa sameysan jirey, riyihiisana waa lisi jiray, badeeco in uu geddin jiray oo u geddin jirey naagtiisa intuusan guursanna waa la

sheegey. Inuu ari ilaalin jireyna waa la sheegey. Marka sanca inuu sameeyey inuu xargihiisa sameysan jirey, tijaaro inuu sameeyey, wixii laga yaqiinay markaas carabta wuxuuna ka sameeynin, wixii carabta marka laga yaqiiney waxkasto uuna sameeyey laguna ammanay ayaad moodeysaa iney jirtey.

Bal Sheekh Abbuu adiguna aan kuu soo gudbinno arrimahaas ka ambaqaad, waad mahadsantahay.

Salaad

Caliyow waad mahadsantahay, [...] farsamayaqaanka biraha Fiqi Buraale ku maqnaa iyo Axmed Nuur ayaa aad ugu dhaadheeraanin kowdheh , ayaga waa ugu shalaaynay ayaka oo naga maqnayeen.

Marka farsamayaqaanka kabatolooyinka ah waxaan filayaa la iga badanyahay aan ku dheraanin. Horta waa raggii horay soo dhameeyeen farsamoyaqaanka iyo kabotolooyinka. Farsamoyaqaanka kabotolooyinka aad iyo aad baa loo liidi jirey, liididaas qalad bey ahayd, waa farsamoyaqaan fiican oo aad u wanaagsan oo aad iyo aad , yacni, wax far leh bey ahaayeen oo aqoon loo lahayn. Waye annaga haddan qabileheen farsamoyaqaan kabotolooyin, duurka lama aadileheen geed lama goyleheen beer lama tacbi laheen, xoolo lama ilaalileheen yacni waxyaalo qaarkooda kulli ragga kuma kici lahayn haddii nin farsamoyaqaan la weyn lahaa nin oo kabaha sameeyo.

Kabahaas waa la liidi jirey markii horey meel waa laga liidi jirey meelna waa laga sharfi jirey xataa markii horey. Waaye kabahaas markii dadkaan doomanka leeyihiin, dhulkaan koofr oo webiga, marka doonta la fuulaayo kabaha waxay leeyihiin ixtiraam, kabaha dadkaan wadwato kabaha waa la iska bixinaa gacanta aa lagu qabsanaa kor aa loo qaadaa. Doontii loolama fuulayo kabaha.

Ninkii kabosameyska haddii la yaqaano ixstaraam oo gaar ah aa la siinayaa haddii oo doonta maraayo. Ujrad lagama qaadaayo, waa la ixtiraamaa ninka kabotolinka eh. Kabaha waa la iska bixiinaa gacmaha aa lagu qabsanaa nimanka doonta fuulayaan, dhinacaan doomaha lagu maro webiya waa sharaf gaar ahaan. Waa la liidi jirey markii horey sharafna waa leeheedna yacni meel waa laga ammani jirey.

Maahmaah iska caan ah waa jirtaa: *kabahaga iyo guntaada mise tolkaada iyo kobohaada ma laga baxo* yacni waa lagu jiraa si kastaba ha ahaadeene. Ninkii ka baxo qatar aas ku sugan yahay, kabahaaga iyo tolkaada dhexdiis ma laga baxo aa la yiri. Waa maahmaah mar horey iga dhacadey. Maxaa loo yiri? Hadduu ninkii kabihisa ka baxo kabo la'aan socodo qatar buu ku socodaa: qodax baa mudeyso bahal baa qaniinaayo dhibaato aa heyso, kuleel baa la kulmaayo.

Kabahaga iyo guntada lagama baxo, mahmahdaasna waa jirtaa, oo saas eh.

Gaar ahaan nimanka kabaha sameeyo waxaa laga ammanaa dadkeyna oo dhirta bixiya waa ammaanaan, dadka dhirta bixiyo waxaa la yirahdaa *reer odeyaal*, farsamoyaqaanka kabaha waa ammaanaan. Waxaa lagu ammaanaa kabaha markii duurka loo socodo waa la qaataa oo dhirta la soo bixiyo daawada laa soo bixiyo lakiin markii geedka loo dhowaado kabihii waa la siibeyaa. Waxaa la

yiri geedka looma dhoweeyo, cago cad baa loogu teegaa geedka. Sharaftaa gaar ah bey leeyihiin kobaha.

Kabaha kala ceynceyn beey leeyihiin kalana muuno dadkaan boqooriinta eh ama suldaamiinta waxaa loo sameyn jirey oo ey kabotoloyiinka, inaa qofka la soo dhoweysto la soo dejiyo inaa waab loo dhiso, dadka qarhooda gabar bee siinayaan ku derayaan, gabar bee siinayaan wee ku darayaan ninka farsamo yaqaanka ah, saas aa la yeeli jirey markii horey inkasto aa la liidiyo. Marka waxaa la yiri ii samey kabo oo yihiin labo iyo toban sarood mese shan iyo toban sarood. Sarood waxaa waaye yacni oo maqaar la isku sameeyey. Labo iyo toban sarood ama shan iyo toban sarood nimanka boqoriinta mese suldaamanka kuwaas aa loo sameynjirey.

Marka ninkii oo qaato labo iyo toban sarood mese shan iyo toban sarood oo kor ee u soo kacayaan waaweyn, ninka hadduu waxba eheen oo kuwaas ku socodo mise malaakh eheen mese nin magac leh hadduu eheen oo kabahaas burbuuran oo ku soo socdaan waxaa la yiri “ma adi maa malaakh eh? Ma adi maa suldaan eh”. Sharafta ee leeyihiin kabaha naftirkooda taliin bey kala lahaayeen. Dadka kale shan iyo lix sarood oo la isku tolo bee qadan jireen.

Kabahaas oo burbuuran oo dhaadheer, kabaha qoriga kabageed baa la yirahdaa.

Kabageed intaa cayn ahayn, kor ahaan waxaa la yirahdaa kabageed, oo semplice ah kabo la qoro waaye, oo lagu qubeysto, suulkii iyo farta dheer baa geeska loogu muuda keligiis, waa lagu soo qobeystaa keligiisa kabogeed. Dhiqada hadduu roob da'aayo oo soconaayo meel fog laguma tegi karo, waa lagu kufaa. Xerada meesha aan guriga ka dhereen baa lagu socsoconaa, dhiqada ayaa lagu soconaa, waana lagu qobeystaa. Marka waxaa jiraan kabageed kale oo kii aan soo sheegay oo madarka loola tago lagu faano, yacni labo dhifir horey iyo gadaal aa lagu gamaa, inta maqaar aa lagu gamaa, waana geed.

Kabageed kale oo lagu faano yacni meesha bulshada loogu tago oo lagu baashaalo, guriga waa laga dheeraan karaa kaas waa loo soconkaraa, kabageedkaan oo dhifir leh. Kabageed oo dhiqaada iyo musqusha u qeebsan yihiin.

Marka waxaa jiraan kabo xajiin kabo jirjiir, kabo xajiin waa la yiraahdaa kaba jirjiirna waa la yirahdaa ninba si buu u yaqaanaa. Kabahaas waxaa sameya farsamoyaqaan kabatoloyin. Dadka kale ma sameyn karo waayo waa lagu talagalaa markaad la sameynaayo. Maxaa yeeley ninkaas ee dadka kale dhaqanka ma yaqaaniin kabo xajiintaas, mid foosha ayuu ka yaqanna, qofka gaar ahaan u yaqaano baa jiro, dadka dhan ma sameyn karaan, farsamoyaqaankaas.

Kabahaas markaad la sameynaayo alaabta lagu suubiinaa, maqaarka oo si caadi ah magedda la magdeeyey aa hoos lagu geliyaa, alaaba kale ee ku ridaan, ayakaa yaqaanne waa lagu tolaa, ninkii oo aad aqyaar eh dadkaan yacni odeyaasha sida Aw Daahir oo kale mise boqoriinta mise suldaaminka ha noqde, malaakh iyo dadkaas weynka ah way isku faanaan waa soo gataan. Meesha ey maraayaan baa jiiq jiiq jiiq jiiq markaas aa lagu soo daranduraa (*harkoo jiiiq ar ja'i tusoo*) gabdhaha waa u ooyaan, waxey

dhahaayaan kabo jiiijiq.

Wax saas ah ayey dhahaan, waa iga maqanyahay, hees lagu bixiyey aa jiro, *kabo jiiijiq ii tolow baa, ila jiif ila jiif lee, kabo jiiq ninkii ii tolaw aa iila jiifadaawsaa ay dhahaan.* Marka gabdhaha ayaa u ooynaayo ninkaas oo jiiijiq ka yeerayo oo ku socodo ee aad iyo aad ugu kalsoon yihiin ee u jaclaadaan. Nin dhalinyare ah waa iska qadan karaa nin weyna waa iska qadan karaa lakiin waa nin gaarey, kistoo qaal waaye, maqaar ayaa lagu sameyn jirey maqaarkaasna ninkii kistoo wax leh ayaa sameysta iyo ninka magac leh, *Kabo jiiq jiiq.*

Kabahaas waxey iska leeyihiin oo u gaar ah farsamoyaqaan baa sameyn jirey oona sameeya hadda, oo la liidi jirey, la caayn jirey, farsamoyaqaan aad iyo aad bey oo wax tar ey u leeyihiin dadkaan kabaha tolo, farsamo oo gaar ahaan oo qofna sameyn karin oo iyaga gaar ahaan u leeyihiin farsamoyaqaankaan oo kabaha tolo, ma yaro xaalkooda, maahmahyo badan ayaa soo galaayo. Kabahaas oo la tolo ee markey la soo kulmaan een, matalan dadkaan ee hirinta, hirinta duusho, yacni oo wax soo gamo oo duurka u duusho, xoolaha soo dilaan, markey duulaan xoolaha yacni soo gamaan yacni falaar ee dilaan oo u duulaan yacni oo soo gaadaan, markii soo gaadaan oo xoolaha meel isku keenaan markey dubaayaan ooy qalahaayaan kobaha waa iska siibaayaan, xurmad gaar ah bey siinaayaan. Ninkii farsamo yaqaanno meesh xibin uu ku leeyahay oo la siinaayo, ximin baa gaar ahaan loo siinaayaa ninka farsamoyaqaanka oo kabaha tolo haddii hirintaas ku jiro gaar aa loo xushmeynaa.

Hirinta waa badan tahay waa ku kala bexeysaa, hirintaan oo gantaal yacni oo gamuunta gameyso yacni oo si gaar ahaan ay u leeyihiin hirintaas yacni ay u xushmeeyaan kabotolooyinka, dadkaan farsamoyaqaanka hirintaan oo kabdhoodka dadkaan markii oo kabaha la gamaayo kabdhoodka kabaha sharaf ey gaar ahaan u leeyihiin. Ninkii farsamoyaqaanka haddii ku jiro xubin ayuu gaar u leeyahay oo sharaf ah, dadkaan kabdhoodka, farsamoyaqaanka.

Wax kale waa la sameykaraa, geed aa la qorikaraa inaa kabdhoodka lagu barbarto. Kow ishaarada oo wax iska barto oo yacni [...] iska barto, oo duulimaad iska barto kabdhoodka gaar ahaan u leenahay. Nabigaaynii Sallalaahu Caleyhi Wasalim markii joogay [...], kabdhoodkaas lama dhaafo, [...] Kabloodkaas lama dhaafo, markii la arko waa la joogsadaa. Marka kabloodkaas xirfad gaar ahaan aan u leenahay waaye, waxaa la yiri geed waa la qorikaraa indho sur ninkii mashaar barto.

Maxaa loo yiri? Kab oo dhamatay aa la suuraa. Kabta aa lagu bartaa geed lama suro.

Xishmi gaar ahaan ee u leeyihiin dadkaan farsamoyaqaanka.

Kab dhamaatey aa la suura taas aa lagu bartaa wax kale ma la surikaro.

Haddii kaa aa jirijirin ma la yeeli leheen kabtaas aa la suraa ayada aa mashaar laga baranaa. Geed lama surayo bir lama suraayo ayada aa iska leh gaar ahaan. Kabdhoodka oo kabtaas lagu dhufanaayo dadkaanaa iska leh yacni farsamoyaqaanka.

Marka ducadiisaa la siinaa ninkii oo meesha hadduu rafaad haysto oo xirintaas ku dhex jiro. Marka farsamoyaqaanka kabatolooyinka

wax badan baa gaar ahaan u leeyihiin sharaf gaar ah ee u leeyihiin, markii horey anagu aan diidi jirney lama liidi karo, farsamoyaqaan yacni dadka oo kabaha sameeyo mise kuwii birta mise kuwii [...] Farsamoyaqaanka aad iyo aad ey sharaf u leeyihiin oo anuga awel aqoon aan u leheen waye oo soomali ahaan hadda aan ogaaney waxtarkooda iyo aqoonkooda. Bal tusaale taasaa tusaale weyn ay noo tahay soomaali, ay miishaarteeda wax ku baraneyso oo la suri karin wax kale, sharaf gaar ah ayey u leedahay dadkaan kabaha sameeyo. Marka arrintii iima qorsheesneyn, aniga intaas aan ku soo gebagebeeyo haddii wax igu soo dhacaan waa ku soo noqonaa mar dambe

Caliyow waa mahadsantahay iyo raggii hortey soo maray waa mahadsantihiiin, aniga intaan yar aan ku daray aan ku taabtaabtay, asalaamu caleykum.

Cali Mudiir

Wuxuu ku kordhiyey, xiriirka ay leeyihiin kabolaha iyo kabdhoodka iyo farsamoyaqaanka iyo fallaaraha xiriirka ee leeyihiin.

Waxa kaleeto in la xoogaa la ishaaro loo baahan yahay sancada magdeynka magedda kabaha laga sameynaayo habka loo sameeyo, maqaarada sida loo sameeyo, ma kabolaha aa tolo mese dadkalaa soo sameystay? Xiriirka ka dhexeeyo ayadana in laga hadlo bal. Ninka maqaarkii oo magedda ka sameynaayo amba adinta uu ka sameynaayo ma asagaa la imaanaaya mise kabolaha leh?

Arrimahaas in la xuso waa loo baahan yahay. Waayo waxaa laga yaabaa ninkii inuu haysto saamihi oo diyaar ah, hadduu heysto, ninkii kabolaha hadduu u geeyo, heshiis intaa ma ka yaraanaayaa mise ka yaraan maayo. Ma isagaa wada leh? Haadduu leeyahay qiimaddii see wada noqoneysaa, wax ma ka nusqaanaayaan? Arrimahaas oo dhan bal Dhegoweynow xoogaa iftiimi. Waa mahadsantahay.

Dhegoweyn

Horta mahadsanid Cali Mudirow. Waxaa jiraa, kabaha dadka tolaa berigii horey dad gooniyey ahaan jireen. Haa ahaadeene, hadda ninkii yaqaanee sancadii bartayba waa tolaa. Dadka gooniga ee loo yiqiin dad la kala leeyahay buu ahaayoo dadka kala raaca oo la kala leeyahay, ha la kala lahaadee hawl haddii la qabanayo raggu si uma wada qabto, waa ku kala horreyeen sancada, dheefta ay ku kalaqadanayan waa ku kala badneyd waa u kala badneyd.

Raga kabo la quursado oo xun bee tolij ireen, iyagoo isku nacfi ah oo isku si loogu wada socod. Ragna rag kabohooda [...] ey ahaayeen.

Sidaasay marka xoolaha ay qadanayaanna u kala badnaayeen.

Marka ninki hebel la yiraahdo iyo dhallinyarada iyo ninkii rag ihiba, hebel baa kabihiiisa, kabtaan hebel tolin kab ma ahoo, meel walba inta joogtaa qaar baa ka magac xumaa dalbashi eh. Ninkaan hebel waa toliyaqaan, ma kabihii hebel baa? Saas aa lagu kala soconjirey.

Maaska iyo idiintaa iga weydiisayna, waxaa jira dhir ay ku aslaan oo ragga sameysto iyadana waa jirtay.

Waxay u sameysanayaan dhir oo dhogorta horta ka buubisa, oo maaska ama idin bey dhahan, idin ka dhigta yaa jirta. Asalka, geed dhir ay yaqaaniin ayaka ku aslaan baa jirta idin noqoneysoo ragga idiin sameysanyaaqano waa ku jiraa.

Maaskana waxay u sameeyaan waa iyagoo dibadda ama dhulkaan

ha uga yimado ama meel kale ha uga yimaadee. Magaaladiiyey ka gataan maaska.

Marka kabta waxay ku kala qaalisan tahay, haddey maas miiran tahay waa qaali.

Hadday saanta xoolaheena tahayna wey ka hooseysaa. Hadday idiin tahay maaska waa ka hooseysaa.

Waxaa ugu qaalisan kab la gashado waa kabta maaska ah. Maxaa yeeley shayga lagu tolax ee yeelmaha looga dhigey ayediina looga dhigey yaa ka qaalisan shayadii kale, waa ka xoolo badan tahay, xoolo badan baa la siineyaa.

Cagbacagtaa laga tolaa kuwaa lid oo labada lugood wada galeynin cagbacagoo iyo yeelmo dambena leh oo qalabiga loo sameeyo oo maaska ey toleya, waa ka qalisan tahay. Labosuunle, kuwoo labo suun waaweyn leh oo inteeda kalena, yeelmaheeda balbalaaran yihiin oo waaweyn yahay inteeda kalena maasaa jiroo iyana waa qaali.

“Shereg” kuwo la yiraahdo, oo ayagu toosan, oo cagtii la doono la gelinayo waa jiraan oo maas ahoo ayana waa qaali, oo cagta ku qafilantahoo gees kulli dhegaha iyo xaggan dambe iyo xagganba yeelmahaa dambe maahane inta kale ka qafulan oo intaasoo dhan cagti qarsoon tahay, oo intaas oo dhan cagta qarsoon tahay, waxaa la yiraahdaa shereg, oo ayana waa ku qaali.

Idiintana haddey dani ku qabsato, anigu maas la sameynaayo ma arag lakiin idiinta intey bir ay yaqaaniin ay asal geliyaan, iney guduudsadaan ooy idiinta sameystaan waa arkay.

Waxaa noogu badisey saanta geel idiinta, waa saan geel , waa qalafsan tahay oo idiintaas waa saanta geel. Marka tolanka waa saanta geel, waa luqunta neefka aaranka aan saa u waaweyneen saantiisa, baa tolanka u badan yihiin. Xataa nirgaha jaqayaa ha u badnaadee iyagoo markaa dhalan oo xoogaaga la eg markey baxaan ama ka dhintaan saantoodaa ha noqoto.

Boggan iyo saanta dhinacyada waa ku qallafsan yahay oo lagama dhigo, laakiin luqunta iyo neefka aaranka ah saantiisa ee aan weynaan baa tolanka laga dhigaa.

Marka ragga saas uu asaga isku raacsaneyn, oo u kala sanca badan yihiin oo una ka qaalisan yahay, waxaan garaneyaa qaar sibraar caano ah lagaga toshaayoo dadka danleyda ahi ka toshaa. Marka carruurta caanaha la siinaayo dhergaan, waxaa la yiraahdaa *war ma kabuu tolax?dibbiro weynaa wuxu, muxuu dibbiray.*

Waxay ku tuseysaa ninkaas kabaha tolaxo in la dherginayo, maalintuu kabaha kuu toleyo in la dherginayo yey ku tuseysaa. Dheregta qaar baa ku dili jirey, oo intuu sibraar weyn oo caano ah u keeno, ama haan caana u keeno, ayuu kabaha toleyaa oo caanaha maanta dhan suu u cabayo marka maalinta ninka kabaha tolaxo waa in la dherjiyaa, haddii kale wuu iska dhigeyaa wuxuu leeyahay ajigu waa dheef xunsan tahay, yacni ma hagaagsana. Nimankana niman la karaba ma aha, gebigoodba. Aji waa dheef xunsan tahay buu leeyahay oo waana kala sanca wanaagsan yihiin, waa kuwii kabaha wanaagsan u toli jirey [...] sancadaada seedow ka daran sannad abaaraad buu yiri, kaa wuu naaqusayeye ma agtahay.

Mid aan aad u garanayana wuxuu yiri “*dad kale aa roobka u dhoween, iga ragooshey*” intuu gabeyga soo siiyey wuxuu yiri “*caawana haruubkaa kaa ka raqoo, reerkii uu kaga jiidey*”, [...]

wuxuu yiri “*tallaabada markay raabac tahay wuxu ma raagaane adigaa raboodkii lagu socday raabid loo tumaye*” buu yiri.

Tumaygaana waxaa lagu tolaa kabaha, horta kabodhige geed ama salalmaax ama kabadhigaha aad maqashay ama salalmaax ama xagar, ama gowlalo, ama xoday geed jilecsan oo marka kabolaha lagu dhufto oo san kaga jebin oo afka la dhafo oo shab yiraa haddii geed adag hoosta uga dhigaa waa soo laabmeyaa kabolihii.

Haddey geedkaas jilecsan ku dhuftaanna markuu afka la galo wey kala soo baxayaan, oo uga soo baxayaa ama wuu ka qabsanayaayoo kala ma soo bixi kari mayaan, geedkaa kabadhige aa la yiraahdaa.

Kabatumena waxaa la yiraahdaa tabarad iyo dhagax talin ah yey u dhigaano kabaha markey cabbaar tolaanba, si saanta iyo tolanka u sii cunaan tabaradaas intee kabatumaha u dhigaan dhagaxa ee talinka ah buu ku tumeyaa.

Dhagaxaas tuurimaayaan waa rartaan, alaabta la raranayo uu ka mid yahay.

Hadda bir baabay u dhigaan ay ku tumaan kuwii baadiyaha weeye kuwii dhagaxa talinka wataan tuureyo. Mishiinka ay ku liseyaan tuurimaayaan waa dhegaxa gooniga ah, oo waa raranayaan.

Wax allaale waxa kale kabolaha kan lagu daruuro ee mudaaga ee mushtarka, mudaaga, ee mudaca ah waxaas oo dhan waa iska leeyihiin oo waa uu raranaayaan.

Alaabta kale culculusna dhagaxaa waa raranayaan talinka ah, kan tabardda ay ku tumayaan, laakiin kan geedka waa isaga guureyaan guriga ay degaan bey geedka weyn ka soo gosanayaan, oo u dhigeyaan, geedkaan kabadhige aa la yiraahdaa, waa geedkaan aan kabahuba la’antiisa tolmimayaan ee kabaha ka hooseeyo iyo marka kabolaha lagu dhirbaaxo afka la gelaya kaboluhu, geedkii jilicsan baa looga gooyey, geed ka adag waa ka jebinayaa ama markuu galo waa ka soo biximaayo waa ka xasaysaneeyaa.

Marka nimanku saasey isu sanca raaceen, dadkuna saas u kala lahaa.

Hilib gaar ahey leeyihiin, xeer oo gooni ahey leeyihiin, geelna marka la qalo gowracey leeyihiin, oo inta cadka gowrac la yiraahdo ayakaa leh, kuwii maalintii horey ka hadalnay miskaha ey leeyihiin wey cunaan.

Marka qoladii uu ahaa markey neef qalato, waa loo dhigeyaa, waxaa la leeyahay gowracooda u dhigaa, haddaa lo dhigin meesha lagu kala dhimay, [...], wax kabolaha la helimaayo, hadduu qariibana gowraca aan loo dhigin oo xeerkaasey iska leeyihiin.

Kanna haddaa miskaha loo dhigin isna [...] miskahaas iskalihiin.

Marka waa lagu kala mag bixi jiray oo magta lagu kala qaybsan jirey, waa lagu kala mag bixi jiray, dulmi weyne waa lagu hayoo, berigii hore geel iney dhaqdaan sida qaalibka looma ogolaan jirin dhawaan bey geel dhaqdeen. Awr bes ayaa loo ogolaan jiray, waa ka ninkii awrkii markuu dhaanshay ee xaabada ku soo guray, ee ku

ugaarsaday, waaka mid yiri “Ajow ku go’ee
[...] boqol halaad siduu u [...]

Marka taa waa la leeyihiin oo nimanka kabaha tolaa iska leh, mid kale waa leeyihiin, labada kuwii kabaha toleyey iyo kuwii birta tumeyey dagaalka waa loo kaxeystaa.

Dagaalyaanka ee wax mara ey jirin waa kuwii kabaha tola.

Colkey raacaanna ma jabaa la oran jirey raagii horey. Wuxuu oran jiray ilaaladaa loo diraa, ayagaa la oranan jiray soo ilaali. Xabbadey wax ridaana la gafimayaan, fallaadha wax ku ridaana la gafimayaan, baqanmaayaan [...] waa dagaalyahaniin.

Tan kale waxay leeyihiin waa deeqsi, oo nimankaan niman ka deeq badan soomaalida ma leh. Dagaal iyo deeq iyo maahmaah iyo dood wey leeyihiin afkaanna waa u badanyihiin waa [...] Haddey ku caayaan, ama ku xifaaleeyaan, naf kaaga kicimaayaan niman darran weeye, oo naf kaaga kicimaayaan. Haddey af gooni lagu wada hadlona waa leeyihiin oo caawo oo dhan haddaad la fadhido ay kula hadleyaan oo aadan garaneynin.

Aqalka waxay u yaqaanaan qandoodi, awuunta waxay dhahaan naagaha, ragga waxay dhahaan yahan.

Ereyadaas ayey ku hadlaan oo ‘awuunta qandoddaha leh’ waxaasey oranaayaan oo afkooda ay ku wada hadleyaan oo, “*Ka libiqso*” haddey ku yiraahdaan waa ka kabbo, waxaasey kugula hadlayaan, ‘*hawl bilamin*’ waa ha la hadlin, haa sheegin weeye, qoriga waxay yiraahdaan ‘bulaal’, balaayo baas yey ku akhriyayaanoo waa ku iibsanayaan adigoo la jooga.

Nimankaan niman aan cilmigooda dhameynikareyno kana baxeyno ma aha, waa cilmi badan yihiin, waa siyasaad badan yihiin. Haddey doonaan iney ku dilaan raggey qabqabteen wuxuu yiri (colow) iney hadlyaan bey damceen oo aanay leyn, wuxuu yiri:

[...] xigga taga oo labo kuskus oo middi, labo xabad [...] ku baaqan, rasaas ku soo ridoo kormariya buu yiri hanna laynina bey oranayaanoo waxwalba wey noo sheegeyaan.

Xigga tag oo halkaa ayda ugu soo dhuumoo, rasaas ku soo rid, laakiin halleyn bey leeyihiin. Marka ninkii afkooda yaqiiney wuxuu yiri: qoryihii markii ingiriisku qabqaban jiray oo la xirxiri jiray la yiri qoryihii soo saara.

Marka ninka Samantar Baxnaan la yiri oo kuwii ayaga ka tirsanaa ey xigxigan yihiin askartiina hareeraha ka fadhido afkana la yaqaan ayaa soo agfadhiistey. Yahaan waxaa la yiraahdaa ninka, marka qoriga bulaal baa la yiri. Markaas uu agfadhistey oo gabeyga buu ugu sheegoo wuxuu yiri ayaga oo askartii la shaxayo:

Allahayow yahaankii dillama ama bulaal sheega [...]

Allahayow yahaankii dillama ama bulaal sheega oo iga baaqdama nimaan bixi ka eegeynin

Allahayow balaayo u keen iyo waxuusan baabeyn buu yiri

iyagii buu maqashiinayaa kuwiina waa la shaxayaa. Kuwaana yahaanka iyo bulaalka iyo baaq midna ma yaqaniin. Marka halkii bey ku diideen oo qoryihii la soo marin waayey. ‘nag’ marka nimanka

cilmigooda mid aynu ka baxayno soona koobeyno ma aha, maanta aniga dadka buugga dhigtana ma ihi mid aan ka wada baxayo ma aha.

Cali Mudiir

Marka markale aan u soo noqoneyaa waa u maaxanayaa, nimanka wax badan baan la isku dhex jirey, Cali Mundirow iga qabo.

Bal hadda Salaadow nimankaan xataa eraybixinnada wanwanaagsan oo qiyaasta iyo jaangooyinta iyo ilyeelka iyo xararta iyo hadaladoodii iyo sancadoodey ku jirtaa.

Nimanku sancadooda erayo ayey waxay ku leeyihiin, sancada la xariirta, murtidana wey ku leeyihiin, xifaalootankana wey ku leeyihiin, xeerkana wey ku leeyihiin.

Marka nimanku niman oo sidoodaba aad mooddo iney ka hormarsanyihiin dadka weeye waana ka hormarsanyihiina ficilan runtii. Bal arrinta meeshaas ka sii ambaqaad.

Waxaa jira kabo gafuur dooro aad mooddo oo soo qaloocaney leeyihiin, dabadana gadaalna aad mooddo wadne oo qurux badan oo xardan oo haweenka loo sameeyo, oo dabo balaaran oo gadaal aad wadno mooddo gafuurka horena waxaad mooddaa, haa, bal arrimahaas ii tilmaan. Waad mahadsantahay.

Salaad

Mahadsanid Caliyoow. Bal horta nimankaan kabaha tola, oo kabaha toli jirey, hadda dad badan baa kabaha iska tosha, horta magiciisa markii horey maxaa la oranjirey? Midgaan baa loo yaqiiney. Marka ma qabiil Midgaan la yirahda ma jiro, marka ninkaas kabaha tola waxaa loo yaqiin Midgaan. Nimankaasna sidooda marka ugu horreysa reerba reer ayuu la degnaan jirey, reero ayey kala ahaayeen. Dagaalka ayaga iyo nimanka birta tumo oo tumaal la yiraahdo bey la kala degnaayeen. Dagaalka marka la aadahayo, sida odayaashii annagu aan ka maqalney, nimankaan tumaasho la yiraahdo ma aadi jirin nimankaan kale ayaa aadi jirey, waxaa la oran jirey dagaalka ay galaan waa xun yahay aa la oran jirey waa la reebi jirey sidii carradaa, soomaalida baa reebi jirtey. Nimankaana dagaalka ayaa hordhig laga dhigi jirey, oo nimankaan dagaalka aa hordhig laga dhigi jirey.

Kabaha marka xoola ayega kafeeya oo kabaha haragooda ugu dhanyahay ma ayan lahayn. Haraga nina waa loo keensan jirey nina waa iibsan jirey, oo harag saas buu ku soo gedi jirey. Haragga marka midna meged bey ka dhigan jireen oo waa megdin jireen oo inta geed la gooyo oo la jafo oo marka la jefo la tumo oo marka la tumo markaas ama geedkaas la kariyo qolofitiisa bey ku dhexridi jireen, waa ku garduudan jiray. Markaas aa la wari jirey oo la waraa markii geedkaas qolofitiisa intaa la tumo oo lagu dhexrido geedkaas magacyo badan buu leeyahay carar waa la yiraahdaa, asal waa la yiraahdaa jaf waa la yiraahdaa, geedkaas ey ku dhex ridaan. Markaa ey isku gaduuto oo banaanka la dhigo oo uu ku qallalo bey haddana caano yar inta qaataan caanahaas cambiid bey yiraahdaan biyo yar ku shubaan oo caano iyo biyo ah aad hoosta ka mariyaan, cambiid baa la yiraahdaa, labo dhagax ey qaataan midna kor ey ka dhigi jireen midna hoos ey labada dhagax siman tahay ay ku jiidjireen markaasaa sarta ee jilcjidhey. Marka sarta, xoolaha annagu aan

heysano oo xaywaanka ah oo rabbaayadda ah waa laga dhigi jirey xoolaha xaywaanka ah oo bannaankana waa laga dhigi jirey. Xoolaha bannanka ah geriga waa laga dhigi jirey, biciidka waa laga dhigi jirey, biciidka kabhiisa inta kabaha ahi ayey ugu qaalisanaayeen, oo biciidka kabhiisu wax la goyn karo ma ahayn, oo biciidka gaar bey la ahaayeen.

Cawsha waa sida oo kale. Haddey ariga kabhiisu, geela iyo lo'da, kabhooda wey kala qaalisan yihiin oo lo'da kabeheeda aa qaalisanaa oo iyaguna isma dhoween iyo geela lo'da kabeheeda saan uma baba'ayaan, geela kabhiisu waa adegyihiin, dhagax haddey arkaan wey kalafuqayaan, waa jebahaya.

Marka ariga waxaa laga jeexaa midka talinka la yirahdo oo marka kabaha la jaangooyo oo jaangooyo leysasaaro, ari haragi baa laga jeexaa. Haddana waa kala jacelyihiin idaha iyo riyaha waa kala jacelyihin, idahay sii jacelyihiin.

Horta waxaa jirey dadka kabaha ma aqoon, halkaan nin baa toli jirey dadka kale haddii lagu arko qabiilooyinkii waagi horey faanfaanka jacclaa waxay la oran jireen *'war ma anaa kabatolahaya war ma anaa midgaan ah?'* wey oran jireen, oo waxaa la oran jirey kabaqaadka iyo kabaruugga iyo yaa la oran jirey. Qaala meesha kabahu gaareen Cali Cumar Gacaney marka uu nimanka reer rendid ka fakanahayo, ayaa waxaa la yiri dhul aan dhaweyn nimaney muddo qaad lahaayeen markaas uu, hadda aniga gabey qabad maahiye , gabey tiriyey oo wuxuu yiri:

Kabta ii tol kebidii horteed waa kulaalnahaye kowkowsan, meesha hawadu kaaley i leedahay

ayuu yiri. Midgaankii iyo kabihii uuga tagtay berri oo kale soo noqodey oo saddax maalmood markuu maqnaa, meeshii lagu yiri markaas uu yiri dadka marka nimankaas dadka kula dirsadeen Aji ey dadka oranjireen, markaas u yiri:

Aji kabihii kuma ma tolnoo xaggey ka soo rogantoo Dagaari marka aa mareysaa dhurwaa jeexay

Markaasuu yiri:

Allahow Midgaankow, indhaha malow lagaa siiyo, muddo baajis baad iagu dishay, ee meyd ha kugu raago, midigta ka imaw, xalaan meel xun jiifsadaye

Waxaa la yiri gacan baa goortiiba soo kogtay Cali Cumar markaas intuu farasada asaga iyo Cali Balo qabsadeenoo waa kii lagu dilay meesha la yiraahdo Jiirtaan Qabnood waa kii lagu dilay.

Horta kabuhu saasey ahaayeenoo kabaha waxaa toli jirey nin la yaqaano oo la yiraahdo meel hebluu deggen yahay meeshaas uu deggen yahay, oo la yiraahdo, waxaanna loo yaqiin ninkaas, midgaan baa loo yaqiin, waa markii horey oo dadka uusan waxba garanahayn, baa loo yaqiiney. Bacdi, waa xoolahana hilib buu ku lahaa hilibkaa

madaxa la yiraahduu ku lahaa. Hadduu meel laba habeen jidha joogo, lama qaadan jirin, lama taaban jirin. wan buuran hadduu yahay, ri' caataa haddey tahay, waxkasto hadduu yahay hilibkaasna asagaa lahaa, kabahana intaa oo cayn buu u toli jirey waxaa jirtey, kabo waxaa la oran jirey saddaxsuun.

Saddax suun bee lahaayeen iyo mid xunoo jilcan, ayey lahaayeen. Kabo waxaa la oran jirey faygamuur, afkaasaa iska go'naayoo, labo suun oo dambey lahaayeen.

Kuwo waxaa la oran jirey shay bey leeyihiin, sidaas u soo godan bey ahaayeen, oo saas intey u soo qalociyaan af saas ah lahaa oo qaali bey ahaan jireen, suunkooda halkaasaa inta laga dusiyaa halkaas la geyn jiray oo sidaas loo dusin jiray oo fey saas u godan bey lahaayeen, kuwaas haweenkaa qaadan jirey oo gaar bey ahaayeen, bari' balaaran bey lahaayeen, afkana saas uu u soo godnaa. Marki barida balaaran inta haddana sidaas ey ahayd yaa haddana inta barida halkaan ey ka soo qoraan bey daba dhallah oo intaas ah bey u yeeli jireen oo haweenkaa qaadan jirey oo *bararaf bararaf* bey oran jireenoo waana kabahana waa la cardhi jirey, oo wax carar la yiraahdo ey ku dhigi jireen. Marka kabaha shayga lagu tolo wuxuu ahaa mid waa balaarnaa oo kabatole aa la oran jirey, oo bari ballaaran buu lahaa oo waa midka gacanta loogu dhuftaa, oo haddee ku heesayaan

Kabatole gilgili, Kabo aan yeelanlahaay

ee sidaas oranjireen weeye, oo saas ey dabada uga dhufan jireen.

Midna mid yar buu ahaa, waxaa la yiraahdaa mudaa oo meesha kabta matalan dhegteedaa waxaasey ku dhigi , weeye.

Midna mudaagaas uu la ekaayoo xarig dhallahoo buuran buu lahaayoo meeshaasey intey ka soo qabtaan bey shey daran oo aanan garaneyn bey, isagoo marna xarigga watuu la soo noqon jiray marna ku mudi jireen. Mid asagana maxaar bey yiraahdaanoo asagana waa ag yaal oo asagana waa ku tolaan, oo waa ku sii shushufaan oo waxay ku sii shushufaan kabaha dhegahooda oo isagana waa hayn jireen.

Middiyuhu mid waaweyn tahay oo kabahoo dhan bey ku jaraan. Mid waa soo qoolaaban tahay oo geed meeshaas waxaa u yaal lool la yiraahdoo lisiin waa la yiraahdaayoo dhawr magac buu leeyahay oo biyo yar intey ku shebaan bey saas yiraahdaan. Lool baa la yiraahdaa oo waa qoolaabanyahay, markaas ee inta qaataan ey saas geedka ugu lisaan intay hadba biyo yar tiliq ku siiyaan ayey ku lisaan. Middiga marka waxay noqoneysaa iyadoo imminka soofe lagu afeeyey ayey noqoneysaa. Marka middigaas hilib laguma gooyo, wax kale laguma gooyo, saantaas maahane.

Middidaa saanta iyo keliya lagu gooyaa, weligeed ma baaba'do ee sidee u socoto, u socoto, u socoto marka dambe wax yar oo caal dhuubanaa ka hara mana afbeesho, oo middidaasna caynkaasey ahayd.

Marka kabuhu waxa laga sheek karo ma aha waa faro badan yihiin, meeshaan dhul kale waxaan ku arkay hal kabo oo keligeed ah, ama

geriga ama biciidka labadiisa garab laga gooyo ama geri laga gooyo waa hal jaan oo keligeeda ah oo lagu socodo.

Waan arkay, oo soomaalida qaar baa ku dhaqma, soomaalidu *region*-kiiba waxa uu isticmaalo waa u gaar wixii oo marka asaga ku isticmaalo waa u gaar.

Kabta dood baa la yiraahdaa, waa kabta jaan geriga ah, meelna waa wiyil midina waa biciidka labadiisa garab, saddaxdaas cayn bey ka waxeeyaan.

Meesha markii horey biciidka gaashaanka laga waxayn jirey, gaashaamaha la oran jirey labada garab ahayd, kabtaas ey ka waxeeyaan, gaashaanka geriga haraggiisa oo dhanna waa laga dhigi jiray asagana kabtaas waa ka waxeeyaan.

Jeerta anigu ma arage, bahalkaan la yiraahdo waa ka waxeeyaan.

Marka anagu bal Caliyoow ayadoo waxyaalo badan ii harhareen oo ana jacleen hadalka inaan, rag baa iga dambeeyoo ka laasto oon maantoo dhan isaga socsoco bal hadda waa kugu soo warey jinayaa.

Cali Mudiir

Waad mahadsantahay, waxaa la gartay, bal xoogaa *interval* la qaato shahi la soo cabo.

Aw Daahir asagoo gaaxday, *nota* qortay, shaah soo cabbay hal saac ugu yaraan ma deeqdee, bal hadda noo dami, noo dami Aw Daahiro.

Haddana waxaa la soo gaarey kaalintii Aw Daahir Afqarshe.

Daahir
Afqarshe

Mahadsanid Caliyow, mawduucakani in badan baa la soo waday, waxaad moodaa, inuu gebagebo taaganyahay, wax badan la taabtay. Anna aanan jacleyn miidkii hore ee lagu hadley inaan ka dabatago ee xoogaa ku tumasho noqoneyso haddii hadalka laaga laastana oo meel aad ka soo qabataa ee xoogaa yar ey adkaaneyso.

Nimanka sameeya saamaha ee sancayaqaanka loo yaqaano, bal horta markooda hore waa tii la sheegay magacooda waagii hore waa tii la sheegayoo waagii hore intii soomaalidu qabaliga iska ahaydee magacyada la kala bixi jirnay waxaa loo yaqiney Midgo, waa yahay Yalxena waa loo yaqiney.

Waxaa kale oo loo yaqiiney Gobey, waxaa kale aa loo yaqiiney Qaansaley, waxaa loo yaqiiney Gabooye, waxaa loo yaqiiney Coloowe, waxaa loo yaqiiney Yahan.

Intaas oo magac oo wada gaar ah ey goono ahaayeen.

Nimankaasi waxay ahaayeen farsamoyaqaan macaruuf ah, oo ilmahooda yare na sancada uu ka barto aabihii ama adeerkii ama, ma garanaysaa, walaalkii cidda uula shaqeynayo ilmahooda yarina uu markiiba sancayaqaan yahay.

Waxaase jirtay dhibaato kale oo ahayd hanti yaraan.

Haddaba siyaabahay u shaqeyn jireen haddeyna yar taataabanno nimankaas sancadooda waxay ahayd saanta waxa la yiraahdo yaa cilmigoodu ku rakibnaa.

Cilmiga saanta kolkaa waa tiro badan yahay waa noocyo kala wada gaar ah.

Saanta waxay kaga shaqeyn jireen labo nooc iyada oo meged ah oo

ay murxiyeen, iyo iyada oo iska sideedi ah oo la qallajiyey oo la waray oo la dhifey oo ceyrin ah labadaan nooc bey ugu shaqeyn jireen.

Haddaba tan iska ceyriin waa la yaqaannaa oo haddaba saantaas suuqa wey taallaa.

Tan kale sidey u shaqeyn jireen hadeynu wax ka yar taabanno, saanta markii horey waa qurmin jireen, markey qurunto ayey dabadeedna haragu ka [...] jiray. Wax allaale wixiisa ahaa dhogorta iyo xuub yar oo wato yaa dibbadda ku dici jiray, ayadu aad iyo aad bey marka la qamiiriyo markaa u qudrqurmooney markaas waxay gelin jireen asal iyo go' ay yaqaanniin, oo ah asalka aynu naqaanno aan eheyn ee la yiraahdo cascado. Cascasadaas waa asal iyagu ay yaqaanniin iyo waxay isku dareen. Markaasaa haddana dib loo qamiirinayaa, waqti labaad.

Qamiirka labaad qurunkii waa ka ba'ayaa, asalkii aa baabi'iyey, wax looga jeedaa saantu iney bararto. Sida maaskuba dibadda la nooga keenay oo saantii kale een annagu ahayn isagu xoolaheeni oo kale ah, u ka qaro weynyahay markaas aa la dooney kolka in la barariyo. Taa waa lagu kala horreeyaa sancadeeda, marka ay bararto ayaa dib haddana loo dhifi jirey, sidii tii [...] oo kale.

Kolka ay qallasho ee dambe ayaa dabadeed lagu isticmaali jirey, marka ay qiimaha weyn tahay waa markaa.

Tan dibadda inooga timaadda ee maaska la yiri oo makiinaduhu ka shaqeeyeen, baad mooddaa iminka in magaalada xoogaa ku qaalisan tahay, laakiin marka la tolo oo hawl lagu qabanayo taa ayagu ay sameeyeen yaa qiimo badan, kolka lagu socdo dibadda, waa yahay.

Tan maaska iyo tan ay sameeyaan labadaba, oo mid la yiraahdo maas mid la yiraahdo meged, labada magac ay kala leeyihiin, markaad dooneysoo iney kuu sameeyaan aad oraneyso noocaa iga samee ama kabo maas ah ii tol, ama kabo meged ii tol, ama kabo saan cayriin ah ii tol, saas aa kolkaas ku oranaysaa.

Ninka ay dooneyaan kolkaa inay wixiisa wanaajiyaan waa gaar, hadda waa la iska daayey marba waxbaa laga baxaayaa marka ay kabaha ku tolyaanee jaanta gooyaanba waxay marin jireen waagii hore xoogaa yar oo gaas ah ayey saa ku oran jireen.

Kabaha horta ciye aad maqasheen ee lagu xarragoodaa ee [...] sheegeer ragga madaxda ahaa iyo naagaha qaaliga ee madax qabti iyo waxaa loo sameeya ee ciyaa waxaa lagu sameeyaa waxaa weeye saliidda gaaska ah, aynu faynuusyada aan ku shidanno ayuun baa sidaa loo taabsiiyaa. Dhawaan ninka xarragoonayo kuwaas oo kale doonayaba waa sameysan jirey, dadkana wey la soo dhawaadeen, dhawaan baa laga wada baxay oo waxaa looga baxay, dhallinyaro iska sufihyiin ah oo suuqa joogto iyo waxaas aa naagaha kabaha ciya ku faduuliya oo ku yiraa *ku dar* ay leeyihiin *ku dar*, kolkii dadkii buu qofkii qajilay kolkaasaa dabadeed la iska daayey. Horta kabaha ciyarsan sancadoodu saas bey ahayd. Ciyaalkaa wax faduulinaya yaana joojiyey, markaas qofwaliba yiri [...] ka bixiyey ma lagu tilmaamilahaa maad iskaba deysid, tilmaantaasey lahaayeen sancadaasna wey lahaayeen.

Saanta sida markii horey u qeybsaneed sidaa weeye. Saanta ceyriina tan lagu [...] ayaa ka wanaagsan ama laga jacelyahay.

Saantaas wexey ahaanjirtey geela iyo lo'da iyo ugaadha.

Ugaar waa kala waaweytahay ee noc walba leh waa yahay. Qofwaliba waa yaqaan bal saamaha waan ku dheeraanay sida loo tolee ee kabaha iyo waxaa looga sameystee, kabaha oo quraahi ma ayan ahynee wixii wax lagu galeynayo oo dhan haddii ay abley tahay, haddii ay bilaawe tahay haddii ay seef tahay haddii ulo dhawaan la sameeyey oo seefoo kale tahay oo la galeynayo ay tahay haddey gaashaanka tahay wax allaale waxaad arkeyso oo dhan saanta nooc walba waa loo sameyn jiray waxaas waa wixii hub ahaa ee la qaadanayey guriga haddeynu u nimaadno saanta waxaa laga sameyn jiray biciidka waad aragteenoo yeel ratiga lagu raro oo kala rog la yiraahdo oo haweeney iyo gabadheeda iyo gabadheeda dambe dee aan weligeedba go'aynoo la yiraah saddex fac be dabadeedna sameyneysaa oo markaa si wanaagsan loo luliyeey sannadkii walba la surto subag baa u shardi ah iyada halkeeda ayey iska ahaaneysaa oo wax badh maran oo wixii laga siisto ee xoolo ee bahashaa gelisaa ee dabadeed si wanaagsan loo liliyaa qiimaheeda lagama sheekeyn karo. Waa yahay, hoggaanka ratiga yaa ka mid ah naagta wanaagsanee hoggaan biciid ah iyo yeel biciid ah oo kala rog ah iyo yeel kaloo raro ah oo biciid ah haddii ay isla hesho iyo baydh biciid ah aqalada qaali ahee reeraha nimankaa aynu sheegnay reeraha ay la deggen yihiin guryahooda uga sharaf wanaagsan yihiin ama gabdhahooda la rarayaa uga sharaf wanaagsan yihiin beydu waxa weeyaan tan lagaga xiro ratiga dhuunta oo ratiga aqalkiisa waxa haya waa xarigaa dhuunta lagaga xirayo iyo daba geliska yeesii qaarkeed oo haya oo ratigii horayna u rideynin dibna u rideynin kolkaasaa hoostana laga caymiyey ratigu intuu aqalka u sidaana intaa weeyey marka hadduu dhan u janjeersado waxaa shardi ah in caynkii la furo markaa dabadeed hadduu dib u rido markaasaa la doonayaa in hadba dhanka ama hore loo ridaa ama dib loo ridaayoo xoogaa la yara hantaaqiyaayoo macal reeryada la isku qabtaa markaasaa dabadeed ratigii uu nafisayaa kolkaasaa lagu celinayaa caynkiisii.

Kuwa horta wax lagu raro kuwaasaa ka mid ah waa shey qaali ah oo aan la wada heli karin qoysaasi wuxuu leeyahay biciidka ayaa laga sameeyaa qoofal oo faraska lagu qoofalaa, oo ratiga lagu qoofalaa, oo iyagana qiimahaa dheeraadka baa reerahaas iska leeyahayoo waxa nimankan ay dheeraad uga noqdeen ileyn waa reer sancayaqaan ku jiree reerkanba reeraha kale lama mid aha. Waa yahay, wuxuu yiri Ismaaciil Mire *“jidhguduud ku wada qoofallay oo jiririq doorsiinay”* markii dabadeed Koofil lagu duulayey, jidhguduudkaas waxa weeyey qoofal markaa wada cusub ayaa la yiri ee kii hore ee duugga ahaa laga wada beddelay fardaha habeenkii, dabadeedna guuraha ay ahaayeen jidhguduudkaas waxa weeye qoofalkii oo wada cusub oo guduudan, haa shakaalka iyo qoofalku waa isla mide, haa markaa dabadeed, maya waa isku midoo midna waa xiridda oo la yiri shakaala kan wax lagu shakaalayana waa qoofalkii labadiisa macno sidaa weeye *“jidhguduud ku wada qoofallay*

oo *jiririq dooqsiiinay*” markaasaa [...] waa habeenimoo lawada arki maayee.